

Qalabka Aqoonta AI Xoojinta Qoysaska si Ay Si Wadajir ah U Sahmiyaan AI



Dulmar Guud oo Qalabka ah

Garaadka Macmalka ah (AI) wuxuu si toos ah u saameeyaa nolosha caruurteenna—laga bilaabo fiidyowyada ay daawadaan ilaa qalabka ay dugsiga ku isticmaalaan. Qalabkan waxaa loo sameeyay in uu ka caawiyo qoysaska iyo macallimiinta inay yeeshaan wada-hadallo cilmiyeysan oo ku habboon da'da caruurta, isla markaana ay dhisaan xirfadaha ay caruurta u baahan yihiin si ay ula qabsadaan adduunka tignolojiyada ee maanta.

Ujeedada Qalabkan

- In la taageero qoysaska si ay ula yeeshaan caruurta wada-hadallo daacad ah oo ku dhisan xiise iyo su'aalo ku saabsan AI.
- In la bixiyo hawlo iyo fikrado ku soo bandhigaya mabaadi'da AI qaab ku saleysan ciyaaro, hal-abuur, iyo ka-fiirsasho.
- In dugsiyada iyo macallimiinta la siiyo agab isgaarsiin iyo istaraatiijiyado si ay AI ugu soo bandhigaan qaab loo dhan yahay oo ku haboon da'da caruurta.
- In la dhiirrigeliyo isticmaalka AI ee caruurta yar-yar si mas'uuliyad leh, anshax leh, oo caddaalad ku dhisan.

Haddii aad tahay waalid leh cunug yar oo xiise badan ama aad tahay hoggaamiye dugsi oo qorsheynaya wacyigelin bulsho, qalabkani qof walba wax ayuu u hayaa.

Aan sahminno mustaqbalka—si wadajir ah!



+



common sense media®



Hagaha Hawlaha ee Waalidiinta Sida aad Caruurta ugala hadli karto AI

Sababta ay AI Muhiim ugu tahay Ilmahaaga

AI meel walba way taallaa—laga bilaabo YouTube ilaa kaaliyeyaasha codka sida Siri iyo Alexa. Fahamka sida AI ay u shaqeeyso wuxuu naga caawinayaa inaan caruurteena ku hagno isticmaal xikmad leh oo tignoolajiyadan ah. Hagahan wuxuu bixiyaa habab fudud oo waxqabad ah oo aad kula sahmin karto AI ilmahaaga, si aad u yeelataan wada-hadallo macno leh.



Sida Loo Icticmaalo Hagahan

1. Daawo [fiidiyowga](#).
2. Adeegso kaararka su'aalaha si aad ula yeelato cunugaaga wada-hadal ku saabsan AI. Eeg jawaabaha tusaalaha ah si ay kuugu noqdaan tixraac.
3. Isku day hawlaha.
4. Qorsheeya isticmaalka tignoolajiyada qoys ahaan!

Talooyinka Waalidiinta iyo Daryeelayaasha

- ✓ Ma jiraan jawaabo saxan ama qaldan—u oggolow caruurta inay fikirkooda si xor ah u sheegaan.
- ✓ Adiguna la wadaag jawaabahaaga—caruurta way jecel yihiin inay maqlaan waxa dadka waaweyn ay ka fikirayaan.
- ✓ Adeegso ereyada hagaha ku jira si aad u sharaxdo erayada adag sida “bias (eex)” ama “algorithm”.
- ✓ Dhiirrigeli su'aalaha daba-galka ah sida: “Waa maxay sababta aad sidaas ugu fikirayso?” ama “Ma sharxi kartaa intaa in ka badan?”
- ✓ Uma baahnid inaad u socoto si nidaamsan—dooro su'aalaha la jaanqaadaya xiisaha cunuggaaga.



Sida Loo Isticmaalo Kaararka Wada- Hadallada



Waa Maxay Kaararka Wada-Hadallada?

Kaararkani waxaa loogu talagalay inay abuuraan wada-hadallo xiiso leh oo ku saabsan AI oo adiga iyo cunuggaaga idinka dhexeeyo.

Kaar kasta wuxuu leeyahay su'aal abuurayso xiise, fikir dhaliil ah, iyo hal-abuur. Waxa kale oo ku jira jawaabo tusaale ah oo kaa caawinaya hagidda ama ballaarinta wada-hadalka.

Ujeedada

Kaararkani ma aha casharro AI lagu barayo, balse waa kuwo keenaya wada-hadallo. Ujeeddadu waa in si wadajir ah loo fahmo oo boos loo sameeyo wada-hadal ku saabsan sida tignolajiyadu u saameyn karto nolosha cunuggaaga.

Maxaa Loo Isticmaalayaa?

Ka-hadalka AI goor hore wuxuu caruurta ka dhigayaa kuwo si miyir iyo mas'uuliyad leh u isticmaala tignoolajiyada.



Goorma iyo Xaggee Lagu Isticmaalaa?

- Xilliga cuntada
- Marka la raacayo ama la sugayo gaadiidka
- Xilliga hurdada ka hor
- Xilliga socodka ama xilliga tignolojiyada aan la ogolayn
- Xitaa kulamada qoyska sida habeenka ciyaaraha



+



common sense media®

Kaararka Wada-Hadalka

1. Gorma ayaad isticmaashaa AI maalinkii?



2. AI waxay wax ka barataa xogaha. Maxaad u malaynaysaa in taasi ka dhigan tahay?



3. Ma dareentay app-yada inay u muuqdaan inay “ogyihiin” waxa aad jeceshahay?



4. Ma u adeegsatay AI inaad wax abuurto, sida qoraal, sawir, ama muusig?



5. Ma ku aamini lahayd gaari is-wada inuu meel ku geeyo? Haday jawaabtu Haa ama Maya tahay, sababtu waa maxay?



6. AI ma noqon kartaa mid hal-abuur leh sida aadanaha?



Conversation Cards

7. AI qalad ma samayn kartaa? Waligaa ma aragtay AI oo qalad samaysay?



8. Ma u malaynaysaa in AI ay leedahay dareen? Haa ama maya? Waa maxay sababtu?



9. Sideed ugu malaynaysaa in AI ay u beddeli doonto shaqooyinka mustaqbalka?



10. AI mar walba ma mid aan eexasho lahayn baa? Sidee ayay u noqon kartaa mid eexasho leh?



11. Waa maxay waxa ugu yaabka badan ee ay AI samayn karto?



12. Maxaad u malaynaysa in AI ay samayn doonto 10 sano ka dib?





Tusaalaha Jawaabaha Kaararka

Kaarka 1aad: Al iyo noolol-maalmeedka

Su'aal: Gormee u malaynaysaa inaad Al isticmaali doonto maalin walba?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Markaan Siri ama Alexa su'aal weyddiyo."
- "Markaan TikTok ama YouTube daawado, waxay i tusaan fiidyowyo aan jeclaan karo."

Kaarka 2aad: Al iyo Waxbarashada

Su'aal: Al waxay wax ka barataa xogaha. Maxaad u malaynaysaa in taasi ka dhigan tahay?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Al waxay eegtaa tusalooyin badan si ay u ogaato hababka, sida app-yada ay u ogadaan waxa aan rabo."
- "Waxay xasuusataa waxa dadku ka sameeyaan khatka si ay u saadaaliso waxa aan rabno."

Kaarka 3aad: Saadaasha Al

Su'aal: Ma dareentay app-yada inay u muuqdaan inay "ogyihiin" waxa aad jeceshahay?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Haa! YouTube had iyo jeer wuxuu ii soo jeediyaa fiidyowyo ku saabsan ciyaarta aan jecelahay."
- "Netflix waxay ii soo bandhigtaa filimaan laga yaabo inaan ka helo, inta badanna waan jeclaadaa!"
- "Waa yaab marka xayeysiin iga soo hor baxdo taasoo ku saabsan wax aan hadda ka hadlay."

Kaarka 4aad: Al-da Abuurista

Su'aal: Ma u adeegsatay Al inaad wax abuurto, sida qoraal, sawir, ama muusig?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Waxaan ChatGPT ka codsaday sheeko qosol leh!"
- "Waxaan sawirkeyga u beddelay kartuun anigoo isticmaalaya Al."
- "Waxaan tijaabiyay Al-da sameysa muusig, waxayna ii sameysay mid aan ka helay."

Kaarka 5aad: Al iyo Go'aan Qaadasho

- "Kaliya haddii uu ammaankiisu aad u sarreyo, balse weli isteerin ayaan rabaa haddii uu wax dhaco!"
- "Maya, maxaa yeelay waxaa laga yaabaa inuu qaldamo"
- "Haa! Al mararka qaar way ka fiican tahay darawallada qaar."


Kaarka 6aad: Al iyo Halabuur

Su'aal: Al ma leedahay hal-abuur leh sida dadka?

Su'aal: Ma ku aamini lahayd gaari is-wada inuu meel ku geeyo? Haa ama Maya? Sababtu waa maxay?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Maya, maxaa yeelay ma laha dareen ama fikrado asal ah."
- "Waa laga yaabaa....waxay isku dari kartaa waxyaabo badan, laakiin sideena oo kale uma fikiri karto."
- "Haa! farshaxanka Al waa cajiib, xitaa haddii aadanuhu ka qayb qaato."





Tusaalaha Jawaabaha Kaararka

Kaarka 7aad: Al iyo Qaladaadka

Su'aal: Al ma samayn kartaa qalad? Ma aragtay Al oo wax si qaldan u sameysay?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Haa! Saxaha-qoraalka (autocorrect) ayaa mar walba sameeya qaladaad qosol leh."
- "Waxaan arkay Al oo bixisay jawaab qaldan markii aan su'aal weydiiyay."
- "Al ma aha mid kaamil ah—waxay ogtahay oo keliya wixii dadku bareen, dadkuna way qaldami karaan."

Kaarka 8aad: Al iyo Dareenka

Su'aal: Ma u malaynaysaa in Al yeelan karto dareen? Haa ama Maya? Maxaa kuu sabab ah?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Maya, maxaa yeelay waa barnaamij oo keliya—ma dareemi karto farxad ama murugo."
- "Al waxay iska dhigi kartaa inay leedahay dareen, balse dhab ma aha."
- "Ka warran haddii Al u malayso inay dareen leedahay, maadaama ay wax ka barato dadka?"

Kaarka 9aad: Al iyo Shaqooyinka Aadamaha

Su'aal: Sidee ayaad u malaynaysaa in Al u beddeli doonto shaqooyinka mustaqbalka?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Shaqooyin qaar way dabar go'i karaan, sida kaashiyarrada ama darawallada."
- "Al waxay caawin kartaa dhakhaatiirta, tusaale ahaan iyadoo cudurradda xilli hore ogaanaysa."
- "Waxaan u malayn in dadku weli shaqo haysan doonaan, balse ay Al la shaqayn doonan halki ay beddeli lahayd"

Kaarka 10aad: Al iyo Cadaaladda

Su'aal: Al mar walba ma caaddil baa? Sidee ayay Al u noqon kartaa mid eexasho leh?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Al waxay noqon kartaa mid aan caddaalad lahayn haddii ay ka barato xog xun ama mid eexasho leh."
- "Haddii Al inta badan lagu tababaro wayo-aragnimada koox gaar ah, si fiican uguma shaqayn karto dadka kale"
- "Waa inaan barnaa Al caddaaladda, sida aan dadka u barno."

Kaarka 11aad: Al iyo Madadaalo!

Su'aal: Waa maxay waxa ugu yaabka badan ee ay Al samayn karto?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Waxan jeclahay farshaxanka Al ee halabuurka leh!"
- "Al-da ciyaaraha fiidyowyada waxay ka dhigtaa jilayaasha kuwo caqli badan."
- "Waxay ila tahay wax cajiib ah in Al ay kula hadli karto sida qof dhab ah."


Kaarka 12aad: Al iyo Mustaqbalka

Su'aal: Maxaad u malaynaysaa in ay Al samayn doonto 10 sano gudahood?

Jawaabo Suuragal ah:

- "Waxaa laga yaabaa in robot-yadu qabtaan dhammaan hawlaha guriga!"
- "Al waxay ka jiri doontaa dugsiyada, iyado caawinaysa ardayda."
- "Rajadaydu waa in Al aysan wax walba la waregin - dadku wali waa muhiim"

Fikradaha Hawlaha



Hawsha 1: Raadinta AI

Fiiri gurigaaga oo hel shan tusaale oo ku saabsan isticmaalka AI.

Qor ama sawir tusaalayaashan, ka dibna ka wada hadla sida ay AI u gaarto go'aanno.



Talo Waalid: Sharax in ay AI ka barato qaababka xogaha. Tusaale, Netflix waxay ku siisaa bandhigyo ku salaysan waxa aad horay u daawatay

Weydii: "Ma u malaynaysaa in AI mar walba saxsan tahay?"

Hawsha 2: AI & Hal-abuurka

U oggolow cunuggaaga inuu sawiro adduun mala-awaal ah (tusaale: "qasri ku yaalla hawada oo leh xayawaanno iyo robot-yo cajiib ah"). Adeegso qalab AI ah sida ChatGPT si aad u abuurto isla fikraddaas. Isbarbar dhig labada sawir.



Talo Waalid: Sharax in AI aysan lahayn fikrado asal ah—waxay isku dartaa oo isku barabar dhigtaa waxa ay xogaha ka baratay



+



common sense media®

Fikradaha Hawlaha 1 & 2, Tilmaamo tallabo-tallabo ah

1. Raadinta AI


Ujeedada: In AI laga dhigo mid muuqata oo la fahmi karo marka loo eego deegaanka nolol-maalmeedka cunuggaaga.

Tallaboyinka:

Ku wareeg gurigaaga oo hel 5 tusaale oo isticmaalka AI ah.

Raadi:

- Sameecadaha wax fahmi kara (Alexa or Siri)
- Nidaamyada talabixinta (YouTube, Netflix, Spotify)
- Qalab ama alaabo ciyaar oo dhijitaal ah



Weydii ilmahaaga:

- Qalabkan ama app-kan muxuu sameeyaa?
- Qaabkee ayaad u malaynaysaa inuu u go'aamiyo waxa uu muujiyo ama yiraahdo?

Qodob Wadahadal: U sharax in AI ay ka barato hawleheena (tusaale, waxa aan gujinno, daawanno, ama aan dhahno) si ay u gaarto go'aanno. Mararka qaar waa sax—mararka qaarna way qaldantaa!

2. AI iyo Hal-abuurka

Ujeedada: In cunuggaaga laga caawiyo inuu isbarbar dhigo farshaxanka aadanaha iyo midka ay AI abuurto.

Qalabka loo baahan yahay: Warqad iyo qalin, internet, iyo qalab AI oo sawir sameeya sida ChatGPT.

Tallabooyinka:

1. Weydii cunuggaaga inuu sawiro adduun mala-awaal ah (tusaale: “qasri ku yaalla hawada oo leh xayawaanno iyo robot-yo”).
2. Fur qalab AI oo farshaxan sameeya, kuna qor isla tilmaanta uu cunuggaagu isticmaalay.
3. **Isbarbar dhig labada sawir. Weydii:**
 - Waa maxay farqiga u dhexeeya sawirkaaga iyo midka AI?
 - Kee u muuqda mid hal-abuur badan ama shakhsi ah? Sabab?
 - Ma u malaynaysaa in AI ay fahmayso waxa ay sawirayso?



Qodob Wadahadal: AI waxay wax u abuurtaa iyadoo isku daraysa qaabab ay ka baratay sawirro hore u jiray. Ma laha fikrado ama dareen sida dadka.



+



common sense media®

Fikradaha Hawlaha

Hawsha 3: AI iyo Saadaasha

Hoos waxaa ku yaalla laba sawir oo ka mid ah bogga “Explore” ee isla isticmaalaha, kana tirsan app caan ah. Ma arki kartaa farqiga u dhexeeya labada sawir, maxaase sababi kara in muuqaalku sidan isu beddelo ka hor iyo ka dib?

Ka hor

Ka dib



Talo Waalid: Caruurta xusuusi in AI ay ka barato waxa ay gujiyaan, sidaa darteed ka fiirsashada ka hor gujinta waa arrin aad u muhiim ah. Ku dhiirrigeli dheelitirnaan warbaahineed adigoo weydiinaayo su'aashan: *“Ma u malaynaysaa inay haboon tahay in AI ay mar walba go'aamiso waxa aan aragno?”*

Hawsha 4: Ciyaarta Qiyaasta ee AI

Ka fikir xayawaan, una oggolow cunuggaaga inuu ku weydiiyo su'aalo “haa” ama “maya” ah si uu u ogaado.

Ka dib 5 ilaa 7 su'aalood, eeg haddii uu si sax ah u qiyaasi karo.

U sharax in AI sidan oo kale u shaqayso—waxay ka barataa xogaha, wayna sii fiicnaataa waqti ka dib.




Talo Waalid: Ka wada hadla sida AI ay u fiicnaato marka xogtu badato, balse ay sidoo kale noqon karto mid eexan haddii xogtu kala duwanaansho lahayn.



Fikradaha Hawlaha 3 & 4, Tilmaamo tallabo-tallabo ah

3. AI iyo Saadaasha



Ujeedada:

In cunuggaaga aad ka caawiso fahamka sida AI u isticmaasho hawlihiisa internet-ka (sida gujinta iyo daawashada) si ay u qaabayso waxa uu arko, gaar ahaan baraha bulshada ama app-yada daawashada (YouTube, Netflix, Hulu).

Tallaboyinka:

- U sheeg in kuwani yihiin laba nooc oo hal bogg ah oo uu leyahay hal qof, mid la qaaday ka hor isticmaalka app-ka iyo mid la qaaday ka dib.
- Weydii: “Maxaa kala duwanaansho ah oo aad ka arkaysaa ‘Ka Hor’ iyo ‘Ka Dib?’” Ku dhiirrigeli inuu sharaxo noocyada sawirrada, sida ciyaaro, xayawaan, ama kalluun marka la barbar dhigo keegag iyo macmacaan midab leh.
- Weydii: “Ma u malaynaysaa in isticmaluhu doortay isbeddelkan mise AI ayaa go’aamisay?”
- Weydii: “Waa maxay sababta keentay isbeddelka?” Ku hag cunuggaaga inuu ka fikiro sida gujinta ama waqtiga lagu qaato wax gaar ah ay u saameeyso waxa AI ay mustaqbalka soo bandhigto.
- Weydii: “Maxaa qaldami kara haddii AI ay ku tusto noocyo gaar ah oo keliya?”

Qodob Wadahadal:

Nidaamyada AI sida algorithm-yada talo-bixinta way faa’iido badan yihiin, lakiin waxay sidoo kale xaddidi karaan aragtideenna adduunka ku aadan haddii aanan feejignaana. AI waa mid awood badan, lakiin waa inaan si miyir leh uga warqabnaa sida ay u qaabayso xulashooyinkeena.

4. AI iyo Ciyaarta Qiyaasta

Ujeedada: In cunuggaaga aad ka caawiso fahamka sida AI ay u weydiiso su’aalo ugana barato xogaha.

Tallaboyinka:

- Ka fikir xayawaan (ha sheegin).
- U oggolow cunuggaaga inuu ku weydiiyo su’aalo haa/maya ah (tusaale: “Ma ku nool yahay badda?”).
- Ka dib 5-7 su’aalood, u oggolow inuu qiyaaso.
- Doorka isku beddela, cunuggaagana ha doorto xayawaan.



Qodob Wadahadal: Tani waxay la mid tahay sida AI u shaqayso—waxay ururisaa xogaha, way qiyaastaa, wayna sii fiicnaataa xogtu markay badato. Laakiin haddii xogtu yaraato ama eexnaato, jawaabuhu sax ama caddaalad ma noqon doonaan.



Fikradaha Hawlaha



Hawsha 5: AI iyo Farshaxanka

Isticmaal qalab AI oo farshaxan ama qoraal sameeya (sida ChatGPT ama SUNO-da muusigga). Kadib, u sheeg cunuggaaga inuu qiimeeyo: Natiijadu ma tahay mid hal-abuur leh? Sidee ayay uga duwan tahay hal-abuurka bini'aadamka?



Talo Waalid: Ku dhiirrigeli cunuggaaga inuu u fikiro sida dhaliile iyo abuure. Weydii waxa uu ka helay ama ku nacay natiijada AI-da, iyo sida ay uga duwan tahay wax uu qof sameyn lahaa. Xusuusi in hal-abuurku aanu ahayn natiijada kaliya, balse sidoo kale ay ku jiraan fikradaha, dareenka, iyo ujeedooyinka ka dambeeya.



Hawsha 6: AI iyo Xallinta Mushkiladaha

Samee fikrad ku saabsan alaab ama app AI ah oo xallin kara dhibaato dhab ah (isbeddelka cimilada, helitaan la'aanta adeegyada, caafimaadka maskaxda).



Talo Waalid: Ka caawi cunuggaaga inuu ka fikiro dhibaatooyin dhab ah oo ka jira bulshadiina ama nolol-maalmeedka, ka dibna weydii: “Sidee ayay AI wax uga qaban kartaa arrintan?” Ku dhiirrigeli inuu si weyn u fikiro, lakiin sidoo kale haka fiirsado xogta loo baahan yahay iyo khataraha suuragalka ah.

Fikradaha Hawlaha 5 & 6, Tilmaamo tallabo-tallabo ah

5. AI iyo Farshaxanka

Ujeedada: Sahminta waxa hal-abuurku yahay iyo sida AI uga duwan tahay fikradaha dadka.

Agabka loo baahan yahay: Qalab AI oo qoraal ama farshaxan sameeya (sida ChatGPT ama SUNO-da muusigga).



Tallaboyinka:

1. Adeegso qalab AI si aad u samayso wax hal-abuur leh (gabay, sawir, ama hees).
2. La eeg cunugaaga natiijada. Weydii:
 - Maxaad ka qabtaa waxa AI ay sameysay?
 - Ma u malaynaysaa inuu hal-abuur leeyahay? Haa ama Maya? Sabab?
 - Sidee ayuu uga duwan yahay wax uu qof sameyn lahaa?

Qodob Wadahadal: Hal-abuurku wuxuu ku lug leeyahay dareen, waayo-aragnimo, iyo ujeedo, kuwaas oo AI aysan lahayn. Si kastaba ha ahaatee, AI weli waxay abuuri kartaa waxyaabo xiiso leh iyadoo dib u habaynaysa fikrado ay baratay.

6. AI iyo Xallinta Mushkiladaha

Ujeedada: Cunugaaga ku dhiirigeli inuu AI u arko inay tahay qalab lagu caawiyo dadka laguna xalliyo mushkiladaha.

Qalabka loo baahan yahay: Warqad iyo qalin ama app dhijitaal ah oo wax lagu sawiro/qoro.

Tallaboyinka:

- Ka hadla dhibaato dhab ah oo uu cunuggaaga danaynayo (isbeddelka cimilada, naafanimada, caafimaadka maskaxda).
- Weydii: “Sidee ayay AI wax uga qaban kartaa arrinkan?”
- Naqshadee alaab ama app AI adeegsada si uu dhibaataada u xalliyo.



Ka wada hadla:

- Xog nocee ah ayay AI-dan u baahan doontaa?
- Maxaa qaldami kara haddii AI-da aan si fiican loo tababarin?
- Qaabkee ayay dadka u caawinaysaa?

Qodob Wadahadal: AI waxay taageeri kartaa fikrado waaweyn, lakiin sidoo kale waxaa la socdo mas'uuliyad. Dadkuna weli waa inay si miyir leh u gaaraan go'aanno ku saabsan sida AI loo isticmaalo.



Qorsheeyaha Tignolojiyada Qoyska

Waa Maxay Qorsheeyaha Tignolojiyada Qoyska

Qorsheeyaha Tignolojiyada Qoyska oo ay bixiso Common Sense Media waa hage fudud oo wax ku ool ah oo ka caawinaya qoysaska inay dejistaan xeerar caafimaad leh oo ku saabsan sida caruurta u isticmaalaan qalabka iyo app-yada ku shaqeeya AI.

Qorsheeyuhu Wuxuu Kuu

Ogolaanayaa: Inaad go'aamiso qalabka iyo app-yada AI ee la oggol yahay (kaaliyeyaasha codka, algorithm-yada talo-bixinta ee YouTube Kids, app-yada waxbarasho ee AI, chatbots).



Inaad heshiis ka gaartaan goorta iyo goobta AI la isticmaali karo (tusaale: xilliga cuntada ama hurdada lama ogola).



In la isku miisaamo isticmaalka AI iyo ciyaaraha hal-abuurka leh, waqtiga dibada loo baxo, iyo la tacaamulka dadka.



In caruurta la xusuusiyo in AI aysan beddel u ahayn waalidiinta, macallimiinta, ama asxaabta.

Qorshayaal da' ahaan habboon oo la daabacan karo waxaad ka heli kartaa halkan: <https://www.commonsensemedia.org/family-tech-planners>



+



common sense media®

Qaamuus

Garaadka Macmalka ah (AI): Waa barnaamij ay dad sameeyeen oo ka dhiga kombiyuutarrada inay sameeyaan waxyaabo ka dhigaaya inay u muuqdaan inay caqli leeyihiin sida dadka.

Algorithm: Xeerar ama tallaabooyin uu kombiyuutarku raaco si uu dhibaato u xalliyo ama go'aan u gaaro.

Eexasho: Marka barnaamij AI ah uu gaaro go'aanno aan caddaalad ahayn sababo la xiriira xogaha oo aan sinnayn ama aan dhammaystirnayn.

Xog: Macluumaadka ay AI wax ka barato—sida fiidyowyada aad daawato ama erayada aad tidhaahdo.

AI-da Abuurista: AI abuuri karta sawirro, muusig, ama sheekooyin.

Barashada Mashiinka: Hab ay AI u sii fiicnaato waqti ka dib iyadoo ka baranaysa xogaha.

Aqoonsiga Qaababka: Awoodda AI ay ku ogaanayso isku-ekaansho ama isbeddello ku jira xogta.

Barnaamij Talo-bixin: Nidaam kuu habeeya waxa aad aragto isagoo ku salaynaya dhaqankaaga, sida fiidyowyada lagu soo bandhigaayo si aad u daawato.



+



common sense media®

Qalabka Aqoonta AI

Xoojinta Qoysaska si ay si Wadajir ah u Sahmiyaan AI

Ku Saabsan Maalinta AI

Maalinta AI waa barnaamij ay aasaastay MIT, oo u heellan ka caawinta ardayda K-12 iyo macallimiinta inay horumaraan samankan Garaadka Macmalka. Wuxuu kadib noqday hay'ad madaxbannaan oo aan faa'iido doon ahayn, taasoo la shaqaysa cilmi-baareyaasha MIT si ay u bixiso manhajyo iyo tababbar xirfadeed, uguna caawiso ardayda iyo macalimiinta inay fahmaan qaabka ay AI u shaqayso iyo saamaynta ay ku leedahay anshaxa. Hadafkeedu waa inay macalimiinta siiso aqoon iyo qalab ay AI ugu dhex daraan fasallada si mas'uuliyad leh, isla markaana kor loogu qaado fikirka dhaliilka ah iyo aqoonta AI ee ardayda.

Maclumaad dheeri ah ka hel halkan: dayofai.org

Ku Saabsan Common Sense Media iyo Common Sense Education

Common Sense Media waa hay'ad aan faa'iido doon ahayn oo lagu kalsoon yahay, taasoo bixisa qiimeyn, ilo, iyo hagitaan ku salaysan cilmi-baaris si ay qoysaska uga caawiso isticmaalka warbaahinta iyo tignoolajiyada. Shaqadoodu waxay awood siinaysaa waalidiinta, daryeelayaasha, iyo macallimiinta inay gaaraan go'aanno xog ogaal ah oo ku saabsan qalabka dhijitaalka ah, iyagoo dhiirrigelinaya isticmaal ammaan ah, anshax leh, oo ay u dhan yihiin caruurta da' kasta.

Xog dheeraad ah ka hel halkan: commonsensemedia.org



+



common sense media®